

'Kaalinta Qarsoodiga ah ee Kaniisadaha Kirishtaanku Ku Leeyihiin Dalka'

25 Dul Qacda 1447 H (12 May 2026) – Mu'assasada Al-Kataib waxay dhawaan baahin doontaa muuqaallo dokumentari ah oo falanqaynaya kaalinta qarsoodiga ah ee ay kaniisadaha kirishtaanku ku leeyihiin siyaasadda Soomaaliya iyo xariirka daahsoon ee ka dhaxeeya madaxda maamulada riddada iyo kaniisadaha reer galbeedka.

Dokumentarigan tixanaha ah oo ka kooban 6 xalaqadood, waxaa diiradda lagu saari doonaa faragelinta kaniisaduhu ku leeyihiin talada dalka iyo hawlaha gaaleysiinta ee ay ciidamada saliibiyiinta iyo hay'adaha tansiirka ka dhex wadaan bulshada Muslimka ah ee Soomaaliyeed.

Dokumentarigu wuxuu si qotodheer u dul-istaagi doonaa:

- Soyaalka madow ee kaniisadaha kirishtaanku ku leeyihiin dalka iyo wadashaqeynta ka dhaxeysa maamullada ridada ah iyo baadariyaasha reer galbeedka ah.
- Tix-raaca taariikhda qaar ka mid ah madaxda murtadiinta ee lagu soo barbaariyay kaniisadaha iyo jaamacadaha kirishtaanka, kuwaas oo uu kamid yahay Xassan Gurguurte.
- Xiriirka ka dhaxeeya wasaaradaha waxbarashada ridada iyo kaniisadaha reer galbeedka iyo saameynta ay gaaladu ku yeeshen manaahijta dalka laga dhigo.
- Kaalinta guracan ee ay hay'adaha waxa loogu yeero samafalku ku leeyihiin faafinta diinta gaalada ee kirishtaanka.
- Kaalinta ay ciidamada saliibiyiintu ku leeyihiin gaaleysiinta bulshada Muslimka ah ee Soomaaliyeed iyo isku dayada xooggan ee ay ku doonayaan in ay dalka uga abuuraan aqalliyad Soomaali kirishtaan ah.

Hadaba, raadraac, xog-aruurin iyo dabagal waqti dheer qaatay kadib, waxaa Markazka Cilmi Baarista ee Al-Kataib, Allaah fadligiis, u suurta gashay inuu daaha ka rogo arimahan kor ku xusan iyo kuwa kale oo muddo badan ka qarsoonaa bulshada Muslimka ah ee Soomaaliyeed. Waxaana Allaah ka rajeyneyna in dokumentarigan uu noqdo mid ummadda Muslimka ah u iftiimiya khataraha maanta kusoo wajahan, hadimooyinka halista ah ee lala maaganyahay iyo xaqiiqada dhabta ah ee ku hareereysan madaxda murtadiinta ah.



وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ